Qawaaniinta iyo sharciyada kuliyada City College

Kuliyadu waxay leedahay sharciyo, nidaam iyo qawaaniin si loo hubiyo in ardayda oo dhami heleen waayo aragnimo wanaagsan, waqtigoodiina ay si fiican uga faa'iidaysteen intay kuliyada joogeen isla markaana ay guul ka gaadheen waxbarashadoodo. Warbixintani waa mid kooban, hadii aad doonayso iyadoo faahfaahsan na waydiiso.

- **Distoorkayaga** (Our Charter)

Distoorkayagu wuxuu sharxaa xuquuqda ay kuliyada ka rajaynayaan ardayda, shaqaalaha, xubnaha kumunutiga xaafada iyo ururada la shaqeeya kuliyada. Wuxuu sharxaa heerarka aanu u dajinay waxqabadkayaga.

- **Nidaamka simida dadka** (Equal Opportunities Policy)

Waxaanu soo dhawaynaa dhamaan dadka uu ka kooban yahay kumunutigu. Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu ka faa'iidaysto waxqabadkayaga. Qof kasta oo kuliyada jooga waxa saran masuuliyad ah inuu ixtiraamo dadka kale, isla markaana uu ka fogaado midab kala sooca iyo dhibaato abuurista. Waa la tixgelinayaa oo la ixtiraamayaa jinsiyada, lab iyo dhedigba, awooda, da'da, qaabka qofku u nool yahay iyo diintaba. Waxaanu la dagaalanaa midabkala sooca, waanu ilaalinaa oo dabagal joogta ah ku samaynaa waxqabadkayaga, waxaanu dhiirigelinaa in kooxaha kala duwani xidhiidh samaystaan.

- **Nidaamka amniga iyo caafimaadka** (Health and Safety Policy and Guidelines)

Sharci ahaan waa in kuliyadu noqotaa meel amaan u ah shaqaalaha, ardayda, dadka booqashada ku yimaada iyo qof kasta oo wax ku noqon kara waxqabadyada kuliyada. Waxaanu si heersare ah u ilaalinaa caafimaadka iyo amniga. Qof waliba wuxuu masuul ka yahay inuu u dhaqmo si amaan ah, isla markaana aanu samayn wax naftiisa iyo ta dadka kale khatar gelin karta.

- **Nidaamka isticmaalida kombiyuutarka** (The Acceptable User Policy)

Nidaamka laga rabo inuu isticmaaluhu aqbalo waa sharci dhigaya inuu qofka kumbiyuutarada kuliyada isticmaalayaa u dhaqmo si wanaagsan.

- **Kelimada dadka laxaadka la'** (Disability Statement)

Tani waxay si faahfaahsan u sharxaysaa qalabka loogu talagalay dadka laxaadka la' iyo kuwa awooda waxbarasho aanay u dhamayn. Waxaanu isku daynaa inaanu la qabsano ardayda ee kama rajayno in ardaydu had iyo jeer la qabsato kuliyada.

- **Tusaalaynta iyo nidaamka cabashooyinka**
  (The Suggestions, Concerns and Complaints Procedure)

Tani waxay kuu sharxaysaa nidaamka aad u samayn lahayd tusaalooyin ama cabasho ama hadii aad ka waramayso arimo kale oo khuseeya kuliyada.

- **Qawaaniintayada** (The Disciplinary Procedure)

Marka aad is qorto koorso, waxaad saxeexaysaa inaad ku dhaqmi doontid qawaaniinta kuliyada. Waxaad kaloo saxeexaysaa inaad fahamtay hadii aad jabiso qawaaniintayada inaanu kaa qaadi doono talaabo kugu haboon. Marmarka qaarkood qofku hadii uu qawaaniinta ugu xadgudbo si xun waa inaanu kuliyada ka saarno. Taasoo noqon karta waqti yar in kuliyada laga fadhiisiyo ama weligaa inaanad soo noqon.

Qawaaniintayadu waa laba nooc. Waxaad ka heli kartaa faahfaahintooda:

Heshiiska waxbarashada

Sharciyada kuliyada

HESHIISKA WAXBARASHADA (THE LEARNING AGREEMENT)

Hadii aad mar hore is qortay waxaad saxeexday heshiiskan. Warqadaa aad saxeexday waxa ku qornaa heshiiska u dhexeeya adiga iyo kuliyada. Heshiisku wuxuu sharxayaa waxaad ka rajaynayso kuliyada iyo waxa aanu kaa rajaynayno.

Kuliyadu waxay samayn doontaa: **(The College will):**

- inay ku siiso barnaamij soo dhawayn ah.
- inay ku siiso qorshe waxbarasho iyo macluumaad ku saabsan waxa aad baranayso, tusaale ahaan inaad kalaaska soo xaadirto, shaqooyinka kooraska ee laguu diro, maalinta lagaa rabo inaad dhiibto shaqo guriga laguu diray, suuragal inay tahay in maalinta dib laguugu dhigo, maalinta kama danbaysta ah ee qiimaynta la samaynayo iyo nidaamka loo dacwoodo.
- Inay keento macalimiin khibrad leh kuwaasoo casharada waqtigooda iman doona, marka aanay imanay waa laguu sheegi doonaa.
- Inay hubiso inaad leedahay macalin kuu gaar ah oo ku caawiya inta aad kooraska dhiganayso.
- Inay kuu ogolaato inaad isticmaasho waxqabadyada loogu tala galay ardayda oo ay ku jirto talosiin, caawimo waxbarasho, horumarin luuqadeed, talobixin shaqo iyo ururka ardayda.
- Inay kula socodsiiso halka uu marayo dadaalkaaga waxbarasho iyo guulaha aad gaadhay.
- Inay hubiso hadii kalaaska aad dhigataa istaago, inay kuu diyaariso sidii aad u dhamaysan lahayd koorsadaada iyadoo laguu badalayo kalaas kale ama laguu badalo qayb kale ama inaad wax ku barato nidaamka open learning (gurigaaga adigoo jooga ayaad kooraska diyaarin kartaa).
- Inay ku siiso fursad aad ku dhiiban karto rayigaaga ku saabsan waxqabadkayaga iyo inaanu kuu soo sheegno waxyaabaha aanu qabanay markaad na siiso talo ama dacwad soo gudbiso.
- Inaanu ku siino talo ku saabsan fursadaha waxbarasho ee kuu furan markaad kooraska dhamayso.

Maamulaha kuliyada, City College, Birmingham

Waxaanu kaa codsanaynaa inaad: **(We ask you to):**

-Markasta timaado ama sharaxdo hadaanad iman Karin kuliyada ama soo daahdo.

-Mobilekaaga dami marka aad joogto goobaha waxbarashada.

- Kalaaska marka aad joogto waa inaad u dhaqantaa sidii qof masuul ah, dadka kale waa inaanad qashqashaadin, ixtiraam macalinkaaga iyo ardayda kale mar walba.

-Dhamayso shaqada laguu diro adigoo dhiibaya waqtiga loogu talagalay ama macalinkaaga kala hadal si uu waqtiga kuugu dheereeyo.
- Shaqo guriga laguu diro waa inay noqoto shaqo aad adigu soo qabatay oo aanad qof kale ka qishin ama hadii aad shaqadaada siiso dad kale si ay u isticmaalaan waxa lagaa qaadayaa talaabo kugu haboon.
- Waa inaad masuul ka noqotaa waxbarashadaada isla markaana aad raadisaa waxa lagaa rajaynayo inta aad kooraska dhiganayso.
- Macalinkaaga waa inaad kala hadashaa horumarkaaga.
- Waa inaad soo celisaa wixii qalab iyo alaab aad amaahatay xiliga laguu cayimay.
- Hadii aad ka tagayso kooraska ama aad badasho cinwaankaaga, shaqadaada ama gunada aad qaadan jirtay u sheeg macalinkaaga.
- Adigaa ka masuul ah inaad ogaato waqtiga la qaadayo imtixaanada, waa inaad is diiwaan gelisaa isla markaana bixisaa lacagta imtixaanada oo aad adeecdaa sharciyada imtixaanada.
- Waa inaad adeecdaa nidaamka loo sameeyay internetka iyo network kuliyada.
- waa inaad adeecdaa sharciyada kuliyada.

Hadii aad ku xadgudubto sharciyada kuliyada ama heshiiska waxbarasho, talaabo kugu haboon ayaa lagaa qaadayaa. Waxaad xaq u leedahay inaad dacwadaadu sheegato. Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan go'aanka aanu gaadhno.

SHARCIYADA KULIYADA (COLLEGE CODE)

Marka aad ku soo biirto kuliyada, waxa lagaa rajaynayaa inaad masuuliyada qaybtaada ka qaadato sidii loo abuuri lahaa meel qof waliba xiiseeyo waxna ka barto. Kuliyadu waxay dejisay sharciyo fudud oo ku saabsan akhlaaqda kuwaasoo ay tahay inaad ku dhaqanto.

1. Waa inaad tixgeliso qof kasta oo jooga kuliyada jinsigooda, diintooda, lab iyo dhedigba, awoodooda, da'da iyo bulshada halka ay kaga jiraanba.
2. Waa inaanad qofna dhibin, gaar ahaan midabkiisa, jinsigiisa iyo awoodiisa. Dhibitaanka dadka waxa ku jirta cayda, aflagaadada, luuqada xun, kaftanka, gidaarada in wax lagu qoro, hanjabaad iyo inaad dadka ka argagixiso.
3. Waa inaanad marnaba qof u xoog sheegan, cabsi gelin, caayin ama u hanjabin. Waa inaanad weligaa bilaabin ama ku biirin dagaal ama akhlaaq xumo. Waa inaanad weligaa qaadan wax hub ah.
4. Waa inaanad khamaarin, cabin khamri ama aanad dhexgelin wax mukhaadaraad ah kuliyada dhexdeeda ama inta aad ku dhex jirto waxqabad la xidhiidha kuliyada.
5. Waa inaanad si foojari ah u saxeexin qof kale magaciisa. Dadka been abuurka ku dalbada lacagaha ama gunooyinka waxa loo gudbin doonaa booliska.

6. Waa inaad ixtiraantaa hantida kuliyada iyo ta dadka kaleba. Qofkii wax xada ama isku daya tuuganimo ama wax jajibiya ama gidaarka wax ku dhajiya waxa laga qaadi doonaa talaabo degdeg ah.
7. Waa inaad sanqadha yaraysaa marka aad marayso meelaha wax lagu barto, farsamada gacanta lagu sameeyo, qolalka dhexdooda, makhaayada, xafiisyada, xafiiska soo dhawaynta iyo meesha baabuurta la dhigto.
8. Cuntada, cabitaanka iyo sigaarka waxa lagu isticmaali karaa meelaha loogu talagalay. Cuntada, cabitaanka iyo sigaarka looma ogola kalaasyada, meelaha farsamada gacanta lagu sameeyo.Inaad sharaab la socoto qolalka dhexdeeda waxay keeni kartaa khatar. Sigaarka waxaad ku cabi kartaa meesha loogu talagalay oo keliya. Candhuuf inaad tufto waxay khatar ku tahay caafimaadka waana mamnuuc.
9. Waa inaad u dhaqantaa si taxadar leh, waa inaanad khatar gelin naftaada iyo ta dadka kaleba. Hadii meesha aad ku shaqaynayso ay u baahan tahay taxadar dheeraad ah, waa inaad feejignaataa.
10. Waa inaad caawisaa waardiyaha(waashmaanka) ilaaliya kuliyada adigoo qaadanaya warqada aqoonsiga(ID) mar walba.
11. Waa inaanad kumbiyuutarada kuliyada ku isticmaalin Software aad adigu leedahay ama mid sharci daro ah. Waa inaanad marnaba faragelin Softwareka, hardwareka ama macluumaadka ay kuliyadu leedahay ama ay isticmaasho.
12. Waa inaanad mobileka u qaadan imtixaanada. Tani waxay keeni doontaa in imtixaanka lagaa joojiyo.

MUHIIM (IMPORTANT)
Wax kasta oo keeni kara qas ama gardaro, ama dhexgelid arimo sharci daro ah ama arimo kuliyada iyo dadka waxbaranaya dhib u keeni kara ama kuliyada u keeni kara sumcad xumo waxaanu u baadhi doonaa si dhab ah, waxaana laga yaabaa inay markiiba kuliyada uu kaa joojiyo xubin ka mid ah maamulka kuliyada.

Xusooso qawaaniinta kuliyada waxa loo dajiyay inay ilaaliso qof walba. Hadii aad ku xadgudubto mid ka mid ah qawaaniinta waxaa lagaa qaadi doonaa talaabo sax ah. Tani waxay keeni kartaa in kuliyada lagaa joojiyo mudo ama lagaa eryo weligaa. Waxaad xaq u leedahay inaad dacwadaada sheegato. Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan go'aanka aanu gaadhno.

Maamulha kuliyada City College, Birmingham

Waan fahmay qawaaniinta kuliyada City College, waxaanaan ku heshiinay inaan ku dhaqmo. Waan fahmay hadii aan ku xadgudbo in talaabo arintaa ku haboon layga qaadi doono

X Saxeexa ardayga : …… Taariikhda: ……